Independence House
Voice of law & freedom

# FAALLO SHARCI

## Sharciga La Dagaalanka Argagixisada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya: Ujeedada, Qodobada, Daldaloollada, iyo Soojeedin

20 March 2026

independencehouse

# Contents


**1. Hordhac ........ 3**

**2. Muhiimadda Sharcigan iyo Duruufaha Dalka ........ 3**

**3. Qodobada ugu muhiimsan ee Sharciga........ 4**

**4. Iska-horimaadka iyo daldaloollada Sharciga ........ 7**

1. Sugnaan la'aanta fal argagixiso........ 8
2. Maareyn La'aanta hantida Argagixisada........ 8
3. Durnaanshaha Maxkamadda Awoodda u leh........ 8
4. Xayiraadda Dhaqaalaha iyo Saameynta Ganacsiga: ........ 8
5. Caburinta Xoriyadda Hadalka iyo Saxaafadda: ........ 8
6. Caddeyn La'aanta Marqaatinimada Khabiir: ........ 8
7. Maxkamadeynta Caruurta: ........ 8
8. Muddeyn La'aanta Magdhawga: ........ 9
9. Xakameyn La'aanta Awoodda Saaraakiisha Amniga: ........ 9
10. Magdhaw la'aanta Dhibane: ........ 9

**5. Gunaanad iyo Talo-soojeedin........ 9**

**1)** Qayixidda Fal Argagixiso: ........ 9
**2)** Iswaafajinta Qaar ka mid ah Qodobada Sharciga: ........ 9
**3)** Is waafajinta Sharcigan iyo Mabadi'da Caddaaladda ee Dastuurka: ........ 9
**4)** Dhisidda Maxkamad Gaar ah u ah Suqsadsiinta Hey'adda NISA: ........ 10
**5)** Iswaafajinta Sharciga la Dagaalanka Argagixisada iyo Sharci Lacag Dhaqista: ........ 10
**6)** Ku Xadaynta Xeernidaamiyaal Mudda Dhaqangalka Sharciga: ........ 10
**7)** Aasaasidda maxkmad u gaar ah caruurta: ........ 10
**8)** Xoojinta Korjoogteynta iyo Isla Xisaabtanka: ........ 10
**9)** Kala saarista hawlaha Sirdoonka iyo Booliiska: ........ 10
**10)** Mideynta Sharciga La dagaalanka Argagixisada JFS iyo Puntland: ........ 10

## 1. Hordhac

Madaxweynaha Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, Xasan Sheikh Maxamuud, oo tixraacaya warqada summaddeeda tahay XGGSH/0257/B11/23 kana soo baxday xafiiska guddoonka golaha shacanka ayaa soo saaray wareegto lagu shaacinayo dhaqabgalka sharci LR 007, taariikhada markay aheyd 20 maarso 2023, oo ciwaankiisa yahay ''**Sharciga La dagaalanka Argagixisada**''. Sharcigan ayaa waxaa soo gudbisay wasaaradda amniga gudaha, waxaana codka aqlabiyadda ku soo ansixiyay labada aqal ee baarlamaanka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya.

Faalladan waxay falanqeyn iyo qiimayn ku samaynaysa qodobada muhiimka ah ee sharciga, iyada oo eegeysa ahmiyadda, ujeedada sharciga, qeybaha cinqaabaha ee uu ka hadlay sharcigan, cidda awoodda u leh dhaqangelinta sharcigan, nuucyada dambiyada ee ay Soomaaliya argagixiso u tixgeliso, waajibaadka uu ku soo rogayo muwaadinka, hannaanka loo maro oogista dacwad argagixiso, iyo habka uu qofka iskaga difaaci karo eed argagxiso.

Sharcigan waxa uu saameyn toos ah iyo mid dadban ku leeyahay muwaadin kasta oo Soomaaliyeed, waxuuna ku soo rogayaa waajibaad, isaga oo siinaya xaquuq, waa sharci ay ka dhalanayaa oogista dacwado ciqaab ah, waxuuna si guud u xeeraniyaa maareynta caddaalad u helidda falalka iyo dambiyada argagixisada, waxuuna muwaadinka Soomaaliyeed u tusaaleynayaa hannaanka uu ka fogaan karo ku luglahaanshaha dabiyada argagaxisada, habka maareynta dadka ku lugyeesha falalka argagixiso.

## 2. Muhiimadda Sharcigan iyo Duruufaha Dalka

Sharciga la dagaalanka argagixisada ayaa ahmiyad gaar u leh maareynta, iyo caddaalada u helidda dambiyada argagixiso ee dalka ka dhaca ama saameynta ku leh Soomaaliya ee dunida inteeda kale ka dhaca, sharcigan waxaa la ansixiyay iyada oo ay Soomaaliya muddo dheer la tacaaleysay dambiyada aragagxisa, dalka uu dagaaldaba dheeraaday kula jiro kooxo dunida argagxiso kaga diiwaangashan. Balse dadka dhaliila waxay sheegaan in uu yahay sharci la soo waariday oo dhoof ah.

Sida ku cad qadobka koowaad ee sharcigan ujeedada sharcigan loo sameeyay ayaa ah la dagaalanka, ka hortaga, iyo ciribtirka hawlaha argagixiso, xakameynta faldambiyeedyada argagxisasada, iyo in caddaladda la horkeeno argagixisada. Sharcigan ayaa diiradda saaraya qayixidda falal argagxisino, ciqaabaha ka dhalan kara dambiyada argagixisada, hanaanka la wareegidda hantida lala xariiriyo argagixiso, asteynta ururada argagxisada, habka qaadista dacwadaha, iskaashiga Soomaaliya iyo dowladaha caalamka ee qaadista dacwadaha aragagxisada iyo isdhaafsiga maxaabiista lagu eedeeyay fal argagixiso, iyo habraaca loo maareynayo qofka ka soo baxa urur argagixiso si uu dowladda kaga mid noqdo,

Waa sharci ahmiyada gooni ah u leh xiligaa Soomaaliya, ay dagaalka kula jirto kooxaha argagixisada, waxaase muhiim ah Iyana in aan xadgudub lagu sameyn sharafta, hantida, iyo nafta muwaadinka Soomaaliyeed iyada oo loogu marmarsiinayo in uu qeyb ka noqday

argagixiso, sharcigana waxuu si kooban u dhigaya habka uu qofka racfaan kaga qaadan karo eedeymo loo jeediyay, ama uu magdhaw u dalban karo si uu caddaalad ugu helo khasaare ka soo gaaray eed been abuur ah oo lagu soo oogay.

## 3. Qodobada ugu muhiimsan ee Sharciga

Sharciga La-Dagaallanka Argagixisda JFS waxa uu ka kooban yahay todoba cutub iyo 58 qodob, oo si guud ugu saabsan ujeedooyinka iyo awoodaha sharciga, qayixidda fal argagixiso, ciqaabta faldambiyeed argagixiso oo ka dhaca gudaha iyo dibadda Soomaaliya, habka iskaashiga caalam ee la dagaallanka argagixsasa, la wareegidda iyo xayiraad saarista hanti argagxiso, habka barista dambiyada argagxiso, iyo hannaanka maamuuska dadka ka soo goosta argagixisada. Waa sharciga waajibaad xoog leh ku soo rogaya muwaadinka Soomaaliyeed, waxuuna xoogga saaraya ka hortaga iyo cadaalad u helidda dambiyada la xariira argagixisada. Hadaba qeybtaan waxaan si kooban ugu sharxayna qodobada ugu muhiimsan sharcigan.

**Cutubka koowaad**, Qodobkiisa **1[aad]**, waxa uu dhigayaa ujeedooyinka sharcigan loo sameeyay, waana saddex ujeedo:

1. La-dagaallanka, ka hortaga, ciribtirka hawlaha argagixiso.
2. Xakameynta faldambiyeedka ka dhasha falalka argagixisinimo.
3. In argagxisisada caddaaladda la horkeeno si waafaqsan sharciga.

**Qodobka 2'aad,** waxa uu ka hadlayaa awoodda sharciga, waxuuna dhigayaa in sharcigan uu ka dhaqangalayo dalka oo dhan, laguna dabaqayo dhammaan falalka la xariira argagixisada, isaga oo la falgalaya Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, sharciga Lacag Dhaqista iyo Maalgelinta Argagxisada. Waxaana sharcigan lagu qaadaya qof walba oo faldambiyeed argagixso ka geysta dalka dibaddiisa, haddii uu buuxiyo sharuudahan; haddii faldambiyeedka ka dhaco dusha gaadiid ka diiwaangashan Soomaaliya ama wata calanka Soomaaliya, haddii falka uu dhibane u noqdo qof Soomaali ah, haddii ujeedada fal-dambiyeedka tahay in waxyeelo lagu gaarsiiyo danaha qaranka Soomaaliyeed gudaha iyo dibadda, ama waxyeelo lagu gaarsiiyo hey'adda caalami ah, ama hey'ad dowladeed lagu qasbo in ay qaado tilaabo gooni ah.

**Waa maxay fal argagixiso?**

Sida uu dhigayo **qodobka 4'aad** ee sharcigan, waxay Soomaaliya fal argagxiso u garaneysaa, dhacdooyinka soo socda, haddii loo sameeyo ujeedo argagixisnimo:

1. Dil qof
2. Dhaawicid qof
3. Kicin rabshada ama abuurid arbush
4. Hoggaamin, gacansiinta ama ka mid noqosho koox argagixiso.
5. Weerarista ciidanka Soomaaliya.
6. Weerar ku qaadista ergooyinka diblomaasiga ah ee jooga Soomaaliya.

7. Adeegsiga hub, walxaha qarxa, ama kiimiko si bulshada loo argagaxgeliyo.
8. Waxyeeleynta goobaha danta guud, iyo qalqalgelinta amniga guud.
9. Hubeynya, maalgelinta, kicinta dad, si loo abuuro fitno, iyo dagaal sokeeye.
10. Afduub, iyo qaadasho lacag baad ah.
11. Weeraris qof ku sugan garoon, saaran diyaarada ama Markab
12. Weeraris markab ama diyaarad
13. Sumeynta cunta, cimilada oo keenta qalqal caafimaad.
14. Afduub diyaarada, Markab, doon, ama gaadiid ha'aado cir, dhul iyo badba.
15. Aruurinta xog ama basaasnimo.

**Cutubka 2aad** ee sharcigan waxa ka hadlayaa ciqaabaadka sharci ee uu la kulmi karo qofka gala faldambiyeed argagixiso, waxayna qodobada 5 illaa 29 ka sharaxayaan ciqaabaha xukun ee qofka la kulmi karo kuwaa u dhaxeeya dil toogasho ah, xabsi daa'in xabsi muddo dheer oo u dhaxeeya 5 illaa 30 sano, iyada oo hadba la eegayo falka argagixiso ee uu galay dambiilaha waxyeelada ka dhalatay.

**Qodobka 12'aad iyo 13'aad** waa qodobo saameyn ku leh warfaafinta iyo baahinta wararka iyo warbixinada la xariira argagixisada, waxayna qofka baahiya xayeysiin ama borobogaando argagixiso, ama si qaldan u tabiya war ku aadan fal argagixiso, waxuuna ku soo rogayaan ciqaab isku jirta ganaax lacageed, iyo xarig. Tanina waxay waxweyn u dhimi kartaa xoriyad hadalka, iyo isku dheelitirka wararka haddii aan si taxadar leh loo eegin dhaqangelinta qodobkaan.

**Qodobka 14'aad**, waxa uu qof walba ku waajibinayaa in uu la wadaaggo laamaha amniga haddii uu helo xog fal argagixiso oo la abaabulayo, haddii ay caddaato in qof ogaa oo uu gudan waayo waajibaadkan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ama ganaac lacageed ama labada oo la isku daray, hadba waxyeelada ka dhalatay falka argagixiso, waxaase jirta dad laga reebayo waajibkaas, sida waalidka, xaaska, iyo caruurta dambiilaha.

**Qodobka 30'aad** ciqaab cafin, qodobkaan waxa uu dhigayaa in dowladda Soomaaliya ay cafis u fidineyso ama ka khafiifineyso ciqaabta ku xusan sharcigan, qof walba oo ka tirsanaa urur ama koox argagixisa oo qaada talaabooyinkan; ku wargeliya dowladda in uu iskii kaga soo baxay kooxda argagixiso, uuna ka tanaasulay afkaartii argagixiso, uuna joojiyay wax walba oo fal dambiyeed ah, iskuna dhiiba laama amniga isaga oo ka gacansiinaya fashilinta falalka argagixiso ee xogta ka hayo.

**Farqada 3'aad** ee qodobka 30'aad, waxay dhigaysaa habraaca ay tahay in la mariyo qofka koox argagixiso ka soo baxay ee doonayo in qeyb ka noqdo hey'adaha dowladda, waxayna muddayneysaa in la hubiyo qof walba muddo shan (5) sano ah.

**Cutubka 3aad** ee sharciga waxaa lagu qeyaxay hannaanka qabashada, la wareegidda, iyo xayiridda hanti argagixiso;

**Qodobka 31'aad** ee sharcigan, waxuu awood u siinayaa hey'addaha hanti dhawrka, xeer ilaalinta, iyo hey'adaha maaliyadda in ay maxkamadda awoodda u leh weydiistaan in ay

xayirto hanti walba oo looga shakiyo in ay fal argagixiso ku lugleedahay, waxaase u furan qof walba oo ay saameyso in uu muddo kooban racfaan ka qaato arrinkaa, ayna maxkamadda dib ugu fasaxdo hantida, haddii ay caddaato in si qaldan loo xayiray hantida, iyada oo ogeysiin la siinayo cid walba oo ay quseyso sida bangiyada, iyo hey'adaha kale.

**Qodobka 32'aad** ee sharcigan, waxuu dhigayaa in mar walba oo ay maxkamada gaarto xukun kama dambeys ah, oo la xariira fal argagixiso, in ay xukunto in la la wareego hanti walba oo ku lug leh falka argagixiso. Cid walba oo dhibane u noqotana, waxaa u furan racfaan muddo 30 beri ah.

**Cutubka 4'aad,** cutubkaan waxa uu ka hadlayaa sida dowladda Soomaaliya ay hey'ad, shaqsi, ama urur ugu dari karto liiska argagixisada, waxaana awoodaas leh xukuumadda federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 33'aad** ee sharcigan ayaa dhigaya habraaca asteynta diiwaanka argagixisada, waxaa soo jeedinta liiska shaqsiyaadka, hey'adda, ururka argagixiso golaha wasiiradda u soo gudbineysa wasaaradda amniga gudaha, si ay u ansixiyaan. Qof walba oo lagu daro liiskaan waxaan u furan uu racfaan u qaato maxkamadda awoodda u leh muddo 30 beri ah.

**Qodobka 34'aad** ee sharcigan ayaa dhigaya habraaca ka saarista diiwaanka argagxiso sharqi, urur, shirkad ama hey'ad, waxaa soo jeedin sameynaya wasaaradda amniga, golaha wasiiradabna waa u codeynayaan, waxaa kale oo saari karo go'aan liis ka saaris maxkamadda awoodda u leh kadib marka uu eedeysanaha ku guuleyso dacwadda.

Cid walba oo dhib ka soo gaaro eedeyn dowladeed oo ay caddaato in aysan dhab aheyn, waxay xaq u leelaneysaa magdhaw iyo raaligelin ama mid kood oo u dhiganta waxyeelada soo gaartay.

**Cutubka 5'aad** ee sharcigan waxuu ka saabsanyahay maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwadaha argagixisada, iyo cidda awoodda u leh oogista dacwadahan.

**Qodobka 35'aad** ee sharcigan ayaa sheegaya in maxkamadda ciidamada qalabka sida ay tahay maxkamadda awoodda u leh qaadista gal dacwadeedyada argagixisada, halka qodobka 36'aad uu dhigayo in cid awoodda u leh oogista dacwadaha ay tahay xeer ilaalinta ciidamada qalabka sida.

**Cutubka 6'aad** waa cutub muhiim waxuuna ka hadlayaa qabashada, barista, iyo xabsi ku heynta qof lagu tuhmay ku lug lahaansha fal argagixiso, waxuuna awood u siinaya laama amniga in ay baarikaraan, xirikaraan qof walba oo la tuhmo, iyada oo aysan heysan waaran maxkamadeed, waxaase laga rabaa in ay 48 saac gudahoos ku ogeysiiyaan maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 39'aad** ee sharcigan ayaa dhigaya in maxkamadda awoodda u leh ay bixin karto xabsi ku heyn tuhunsanaha, muddo aan badneyn 90 beri, haddii aan lagu qancin

caddeymaha, si loogu sameeyo baaris, oo ka dhigan in qof xabsi lagu hayn karo lix bil iyada oo aan maxkamad la geyn.

**Qodobka 43'aad** ee sharcigan ayaa ogolaanaya in caddeymaha electric ah sida muuqaalada, sawirada, codadka, iyo qoraalada loo adeegsan karo caddeyn ahaan maxkamadda horteed, marka la oogayo dacwad la xariirta fal argagixiso.

**Qodobka 47'aad** ee sharcigan ayaa ogolaanaya in laamaha amaanka ay dhageysan karaan xiriirada isgaarsiineed ee tuhmanayaasha sida taleefoonada, kadib marka ay fasax ka helaan maxkamadda awoodda u leh, haddiise degdeg tahay waxaa ogolaanshah bixin kara taliyaha hey'adda nabad sugidda, waase in maxkamadda ogolaasho ku bixisaa 24 saac gudahood, haddiise ay maxkamadda diido bixinta ogolaasha, caddaymaha lagu helay dhageysigaas looma adeegsan karo maxkamadda horteeda.

**Qodobka 48'aad** ee sharcigan ayaa hey'adaha amniga u fasaxaya in maxbuuska laga qaado dheecaano ama astaanaha faraha, muudanda indhaha, si loogu adeegsado xaqiijinta tuhmaha ama baaris kale oo falka xiriir la leh, haddiise tuhmanaha uusan qaangaar aheyn aheyn in waa in waaran ama fasax laga helo maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 49'aad** ee sharcigan, waxa uu saraakiisha amniga awood u siinayaa in baaraan, xiraan, ama xanimaan qof ama alaab walba oo lagu tuhmo fal argagixiso oo ku sugan xuduud, markab ama diyaarad dusheed, iyaga oo aan heysan wax waaran ah, qofkii aan la shaqeyn saraakiisha amnigana waxa uu muteysankaa ciqaab sharci.

**Cutubka 7'aad,** Sida ku cad qodobka **51aad ilaa 56'aad** ee sharcigan, waxuu dhigayaa habraaca iskaashiga dowladaha caalamka iyo Soomaaliya ee la dagaalanka argagixisada, waxuuna dhigayaa hab isdhaafsiga maxaabiista, iyo iskugu gacan gelinta eedeysanayaasha, sababaha lagu diidi karo gacangelinta eedasanaha.

Sida ku cad sharcigan qodobkiisa 57'aad sharcigan waxuu baabi'inayaa sharci walba oo ka soo horjeeda oo ay Soomaaliya laheyd.

## 4. Iska-horimaadka iyo daldaloollada Sharciga

Inkasta oo sharcigan yahay muhiim ahmiyad gaar ah u leh la-daggaalanka argagixisada, iyo illaalinta nafta, sharafta, iyo hantida qofka Soomaaliyeed, iyo aadanaha kunool Soomaaliya, waxaa muuqata in ay jiraa dulduleelo u baahan in wax laga saxo si sharcigan u noqdo mid ay fududaato dhaqangalkiisa, loona ilaaliyo xuquuqda muwaadinka Soomaaliya, loogana hortago ku takrifal awoodeed. Waa sharci ku saabsan xaalad degdeg ah, dhalinaya ciqaab, Soomaaliya oo ah dal ku jira dagaal ka dhan ah ururo argagixiso, aysana dadkiisa aqoon dugusan u laheyn dambiyada argagixisada, ayna adag tahay in la helo diiwaanka dadka ku jira liiska argagixisada. Dhaqangelinta sharcigan waxay u baahantahay taxadar iyo isla xisaabtan dheeraad, si loo dhawro xaquuqda aadanaha muwaaddinka Soomaaliyeed. Hadaba halkaan waxaan ku soo

bandhigeynaa meelaha ay tahay in wax laga qabto. Marka laga soo tago luuqadda iyo erayada sharciga, waxaa jira qodo waaweyn oo ay tahay in dib u eegis lagu sameeyo ama loo sameeyo habraacyo lagu xakameynayo awoodda xad dhaafka ah ee uu siiyay saraakiisa amniga.

Daldaloollada iyo iska-horimaadyada qodobada Sharciga waxaa kamid ah;

1. Sugnaan la'aanta fal argagixiso: Sharcigan isaga oo ka jawaabaya baahida loo qabo helidda sharci lagu maareeyo arrimaha argagixisada, caddaladdana lagu horkeeno dambiilayaasha ayaa la sameeyay, waana sharci quseeya xaalad degdeg ah, ayna ka dhalaneyso cuquubo cinqaabeed, waxaase muuqata in aan si sax ah loo caddeyn dambiyada argagixisada, sida ku cad qodobka 2'aad ee sharcigan waxuu dhigayaa liis falalka argagixisada, balse keliya waxa uu sheegay in la eegayo ujeedada, ee ma cadeyn habraac kale, oo lagu hubinayo in falka yahay mid argagixiso. Dhanka kale marka la eego cutubka ka hadlaya ciqaabta falalka argagixiso, waxaa lagu sheegay dambiyo aan lagu xusin liiska qodobka 2'aad ee sharcigan, sida faafinta wararka la xariira argagixisda.
2. Maareyn La'aanta hantida Argagixisada, sharcigan sida uu qabo dowladda Soomaaliya waxay la wareegeysaa hanti looga shakiyo in ay xiriir la leedahay argaggixisada, sida ku cad qodobada 31, iyo 32, mise sheegin sanduuqa dowladeed ee ay hanti ku dhacayso, iyo sida loo maareynayo.
3. Durnaanshaha Maxkamadda Awoodda u leh: Sharcigan waxa uu dhigayaan in maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwadaha argagixisada ay tahay maxkamdda ciidanka qalabka, balse, sida uu qabo dastuurka JFS ma ahan maxkamadda dastuuri ah, ee waa maxkamad gaar ah oo quseysa anshax marinta ciidanka, waxaase isweydiin mudan sida ay u qaadeyso dacwadda qof madani ah.
4. Xayiraadda Dhaqaalaha iyo Saameynta Ganacsiga: Sharcigan waxuu saameyn taban ku leeyahay dhaqdhaqaaq dhaqaale ee muwaaddin ka Soomaaliyeed, waxaana suurto gal ah in qof hantidiisa ay si fudud u gasho liiska hanti argagixiso, iyada oo aysan jirin habraac cad oo qofka uu ku beri noqon karo, haddii uu dhaco macaamil aan kutala gal aheyn oo uu la yeesho koox ama qof argagixiso ah.
5. Caburinta Xoriyadda Hadalka iyo Saxaafadda: Sida ku cad sharcigan, qodobada 12 iyo13, waxaa dambi ah, oo ay ka dhalaneysaa ciqaab adag, baahinta warar iyo xog qaldan, oo la xariirta fal argagixiso, erayga war been abuur ah, ma ahan wax cayiman oo leh halbeeg la isla garanayo, daba halkaan waxaan ka muuqda in haddii ay maamulka leeyihiin ujeedo ay ku tilmaami karaan baahinta xogta fal argagixiso been, taas oo waxyeelo loogu geysan karo, warbaahin ama wariye tabiyay xogta.
6. Caddeyn La'aanta Marqaatinimada Khabiir: Inkasta uu Sharcigan dhigayo in khabiirka uu noqon karo marqaati sida ku cad qodobka 45, hadana waxuu u baahanyahay in si cad loo sharaxo habka iyo hannaanka ay ku noqon karto caddeyn warqad aan saxiix laheyn.
7. Maxkamadeynta Caruurta: Sida ku cad sharcigan fal dambiyeed argagixiso waxaa geli kara caruur iyo qof aan qaangaar ahayn, mise cadda habka maxkamadeynta

caruurta, waxaase cad in caruurta la saarayo maxkamad ciidan, iyada oo laga dheehan karo qodobka 48 ee sharcigan.

8. Muddeyn La'aanta Magdhawga: Sida ku cad sharcigan qofka ama hey'adda ay caddaato in lagu xadgudbay, oo ay beenowdo eedaha argagixiso ee loo jeediyay, waxay leedahay magdhaw, balse macadda habraaca uu qofka ku helayo magdhawga iyo mudda uu sugayo, iyo haddii la siin waayo waxa u foran.
9. Xakameyn La'aanta Awoodda Saaraakiisha Amniga: Soomaaliya oo ah dal ka soo kabanaya colaado, kuna jira dagaal argagixiso, waxa uu sharcigaan siiyay saaraakiisha amniga awood aan laheyn xad, mana cadda habraac hufan oo qof muwaaddinka ah, uu ku dhawran kara xaquuqdiisa, ama uu kaga gaashaaman karo eex, iyo caga jugleyn.
10. Magdhaw la'aanta Dhibane: sida ku cad sharcigan, hey'adaha amniga waxay eedeysanaha ku sameyn karaan baaritaano caafimaad, waxayna ka qaadi karaan muunad, haddi xogta eedeysanaha si qaldan loo adeegsado, ma cadda habka uu eedeysanaha magdhawga ku heli karo.

## 5. Gunaanad iyo Talo-soojeedin

Sharciga La-dagaalanka Argagixisada JFS, waa sharci muhiim u ah ilaalinta iyo badqabka dadweynaha Soomaaliyeed, iyo caddalad horkeenidda dambiilayaasha falalka argagixiso, waxaase dhanka kale jira walaac laga qabo dhicista tacadiyo ka dhan xaquuqda aadana, ku tagrifal awoodeed, iyo dhawris la'aanta sharafta iyo badqabka hantida muwaadinka Soomaaliyeed. Sidaan falanqaynta hore muujisay, sharcigu waxa uu leeyahay daldaloollo sharci, iyo mugdi ku gadaaman la xisaabtan la'aan hey'adaha amniga iyo saraakiisha amniga ee uu sharcigan siiyay awood xad dhaaf ah oo ay ku baarikaraan qof, ama hey'ad walba oo ay ka shakiyaan.

Talo soojeedinada soo socda ayaa gacan ka geysan kara in sharcigu noqdo mid la hirgelin karo, oo wax-ku-ool ah, isla markaana wax ku biiriya dadaallada lagu hagaajinayo helitaanka sharci la daggaalan argagixiso oo hufan, kana hortaga dambiya argagixisada, dhawran badqabka muwaaddinka Soomaaliyeed:

1) Qayixidda Fal Argagixiso: Sharciga waxa uu diiwaan dheer ku qoray liistada falalka loo aqoonsanayo fal dambiyeed argagagixiso, balse si cad uma qayixin fal argagixiso, keliya waxa uu bixiyay fasiraad furan, oo ah in la eegayo ujeedada, oo si kasta u sarifmi karta, mana sheegin hannaan la raacayo oo lagu kala saarayo ama lagu hubiyo in uu fal argagixiso yahay iyo in kale.
2) Iswaafajinta Qaar ka mid ah Qodobada Sharciga: Sida ka muuqata qodobada qaar ee sharciga waxay keenayaa jaahwareer iyo isku ekaansho, hadaba waxay u baahanyihiin in siiqeyn iyo is waafajin lagu sameeyo qodoba qaar oo  ka mid ah sharciga sida 4(4)), 6(1)), qodobada18, iyo, 23 , si la mid ah 4(4)), iyo 6(3)) iyo qodobada  10, 12, 13 iyo  19, si la mid ah, qodobka 4(3), (9) iyo qodobka (10)).
3) Is waafajinta Sharcigan iyo Mabadi'da Caddaaladda ee Dastuurka: Sida ku xusan sharcigan, maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwadda la xariirta fal

argagixiso, waa maxkamadda ciidanka, halkaas, waxaa ka muuqda in haddi uu dacwadda qeyb ka noqdo qof madani ah, la saaridoono maxkamadda ciidanka. Dhanka kale sida uu dhigayo dastuurka cusub ee JFS baarlamaanka ayaa soo saaraya sharci xadidaya ikhtisaaska maxkamadd ciidanka, welina ma soo bixin.

4) Dhisidda Maxkamad Gaar ah u ah Suqsadsiinta Hey'adda NISA: Sida muuqata sharcigan waa isku dhaf, oo waa sharci ah cinqaab, isla markaana ah sharci quseeya arrima sirdoon iyo xog aruurin, hadaba si aysan iskugu qasmin arrimaha, oo ay u xafidnaanto aruurinta xogta ee hey'adaha amniga, waxaan talo ku soo jeedineynaa, in la dhiso maxkamad gaar ah, oo qabata fasaxyada baarista iyo horqabateynta xogta ee hey'adda NISA.

5) Iswaafajinta Sharciga la Dagaalanka Argagixisada iyo Sharci Lacag Dhaqista: Sharciga La daggaalanka Argagixisada, waxuu maxkamadda ciidanka siinayaa ikhtisaaska qaadista dacwadaha aragagixisada, halka sharciga La dagaalanka Lacag Dhaqista iyo Maalgelinta Argagixisada uu ikhtisaas iinayo Maxkamadda Gobolka oo ah maxkamad madani ah.

6) Ku Xadaynta Xeernidaamiyaal Mudda Dhaqangalka Sharciga: Sharcigan sida uu dhigayo waa sharci quseeya ka hortaga iyo caddalad u helista fal dambiyeedyada argagixisada, hadaba waa sharci quseeya xaalad degdeg ah, mana ku cadda muddada uu dhagangalyahay, si hadaba xal loogu helo, waa in xeernidaamiyaasha lagu xadidio mudda uu dhagangal yahay.

7) Aasaasidda maxkmad u gaar ah caruurta: Sida ku cad sharciga, waxuu saameyn ku leeyahay caruurta gaar, ahaan kuwa lagu tuhmo in ay ku lug leeyihiin falal argagixiso, hadaba waxaan talo ku soo jeedineynaa in ikhtisaas loosiiyo maxkamadda caruurta ama loo asteeyo garsoorayaal gaar ah oo ka tirsan maxkamadaha madaniga ah.

8) Xoojinta Korjoogteynta iyo Isla Xisaabtanka: Sida ka muuqata sharcigan, waxaa jira awood xad dhaaf ah, oo la siiyay laamaha aminga, gaar ahaan nabad sugidda qaranka, mise muuqato saameyn isla xisaabtan oo dadweyne, ama baarlamaan, hadaba si aysan u dhici tacadiyo xaquuqul insaan, waxaa tixgelin u baahan in baarlamaanka Soomaaliya ay yeeshaan guddi dabagal, oo gaar u ah arrimaha la dagaalanka argagixisada, iyo amniga, oo la xisaabta hey'adaha amniga ee ku lugta leh la dagaalanka argagixisada, warbixino ka dhageysta tacadiyada ay geystaan saraakiisha amniga.

9) Kala saarista hawlaha Sirdoonka iyo Booliiska: Sida ku cad sharcigan oogista dacwadaha la dagaalanka argagixisada iyada oo aan la kala asteyn waxaa ka masuul ah xafiiska xeer ilaalinta ciidanka, waxaase dhici karta in dacwadda ay qeyb ka noqdo qof madani ah, ama ay la xariirta xog baaris oo sir ah, hadaba si aysan u hungoobin dadaalada xog barista ama sirdoonka, waa in arrimaha la xariira ay maraan hab raac ka duwan tan dacwadaha kale ee argagixisada.

10) Mideynta Sharciga La dagaalanka Argagixisada JFS iyo Puntland: Marka la eego sharciyada kale ee dalka ka jira, maamulka Puntaland ayaa leh sharci la dagaalan argagixiso, hadaba waa in sharciyada dalka noqdaan kuwa mid ah.

Independence House
Voice of law & freedom

## QORE:

*Hassan Mohamud,* waa qoraa aqoon u leh arrimaha sharciga, maamulka guud, iyo warbaahinta. Wuxuu muddo dheer ka shaqeynayaa arrimaha saxaafadda. Wuxuu haystaa shahaadada Master-ka ee Maamulka Guud oo uu ka qaatay Jaamacadda Lincoln, iyo Diploma heer sare ah oo sharciga ah oo uu ka qaatay Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed, iyada oo ay u dheertahay tababaro dheeraad ah oo la xariira Xaquuqda Aadanaha ee Caalamiga ah. Hassan wuxuu ka qayb qaataa horumarinta iyo dajinta siyaasadaha, u ololeeyaa difaacidda iyo horumaranta **xuquuqda aadanaha.** Wuxuu u dhaqdhaqaaqaa horumarinta hufnaanta sharciga iyo kor u qaadista helitaan-ka caddaaladda loo simanyahay oo **Soomaaliya** ka hirgasha

20 March 2026